SMITTSKYDDSBLAD

Patientinformation

Hepatit C

Översättning till somaliska

Version 2022-03-15

# Cagaarshow/jooniskaC, macluumaadka bukaanka iyo xeerarka hab dhaqanka

## Warqadda xakamaynta cudurka faafa ee saraakiisha difaaca cudurada faafa

### Maxaad adigu u heshay macluumaadkan?

Dhiig lagaa qaaday ayaa lagu ogaaday in aad qabto cagaarshowga/jooniska C,. Warqaddan waxaa ku yaala macluumaad ku saabsan cagaarshowga/jooniska C iyo waxa aad u baahan tahay inaad ka fikirto maadaama aad qabto cagaarshowga C.

### Waa maxay Cagaarshowga C?

Cagaarshow C waa fayras ku dhaca beerka, laakiin bilawga hore ee cudurka, dadka badankiisu wax astaamo ah ma yeeshaan. Cudurka caabuqu isaga ayaa iskii isaga bogsada, laakiin dadka intooda badan wuu ku dabadheeraadaa, cudur ay la noolaadaan muddo dheer. Sannado badan ka dib, cudurka cagaarshowga C oo aan la daaweyn wuxuu beerka ku keeni karaa dhaawac. Waxaa maanta jira daawo fudud oo daaweynaysa cagaarshowga nooca C, sidaas darteed waxaa muhiim ah in aad la kulanto dhakhtar iyo kalkaaliye caafimaad oo kaa caawinaya daaweynta cagaarshowga C. Daawada lagu guuleystay waxay samaysaa inaad cudur la'aan noqoto oo uu yaraado khatarta dhaawaca beerku.. Booqashada dhakhtarka iyo haddii ay dhacdo inaad daawo qaadato labaduba waa bilaash.
Caabuqa cagaarshowga C ee bogsadaa kamaa ilaalinayo inuu dib markale kuugu dhaco.
Ma jiro tallaal ka horteggeya cagaarshowga C.

### Sidee loo qaadaa cagaarshowga C?

Cagaarshowga C waxa lagu kala qaadaa dhiig qaba cudurka. Waxay dhici kartaa marka qofka daroogo isticmaalaa uu qof kale la wadaago siliijyada laysku duro/cirbada, koobabka wax lagu qaso ama qalab kale. Xaalado naadir ah ayaa cudurka caabuqa lagu kala qaadaa dhiig cudur faafa leh oo soo gaara maqaar dhaawacan ama xuubabka jirka. Waxaa jirtay khatar ah in cudurada faafa ee laysugu gudbiyo dhiiga iyo badeecooyinka dhiigga ee wadanka Iswiidhan gudahiisa intii ka horeysay 1992dii. Wixii markaas ka dambeeyay, dhammaan badeecooyinka dhiigga ee cagaarshoga C waa la baaraa, sidaas darteed halista cudurka caabuqa aad ayuu ugu yar yahay Iswiidhan gudaheeda maanta, laakiin way ka dhacdaa meelo kale oo adduunka ka mid ah.
Khatarta ah in lagu kala qaado galmada siilka aad bay u yar tahay. Khatarta caabuqu waxay badan tahay inta la samaynayo galmada taasoo keeni karta dhiigbax ama xuubka oo dhaawacma sida galmada dabada. Waa muhiim inaad isticmaasho kondom marka aad galmo la samaynayso lamaane ku meel gaadh ah ama marka ay jirto khatar dhiigbax ah ama uu xuubka dhaac gaaro.

Cagaarshowga C laguma kala qaado marka laabta/xabadka laysi saaro, dhunkashada ama ilmada. Saxarada, kaadida, mataga ama diifka/duufka aan dhiig la socon iyagana laguma kala qaado. Dhiiga ku ba'ay maqaar aan dhaawac ahayn sidoo kale khatar uma aha caabuqa.

### Waxqabad/meherad xirfadeed

Caadi ahaan caabuqa cagaarshowga C ma keeno wax xadeyn ah (xad u yeelid) oo ku yimaada hawlahaaga xirfadeed (shaqadaada) ama waxbarashadaada.

### Uurka

Khatarta ah in haweeneyda uurka leh ay qaadsiiso ilmaha way yar tahay, wax ka yar 5 boqolkiiba. Sidaas darteed cagaarshowga C caqabad kuma aha uurka ama naasnuujinta. Haddii aad sii qorshayn karto, way kuu fiican tahay inaad hesho daawo ka hotegeysa cudurka inta aanad uur yeelan kahor.

### Raad raaca cudurada faafa – waa maxay macnaheedu?

Waa muhiim in la helo dadka kale ee laga yaabo inay qaadeen oo laga yaabo inay sii faafin karaan caabuqa. Sidaa darteed ayaa raadraaca caabuqa loo sameeyaa, taas oo macnaheedu tahay inaad u sheegto qofka masuulka ka ah raadraaca caabuqa dadka adiga ku qaadsiiyey – ama kuwa aad qaadsiisay. Aqoonsigaaga looma khashifi doono iyaga/dadkaas.
Waxaa waajib kugu ah inaad ka qaybqaadato raadraaca caabuqa

**Talooyinka ku saabsan nadaafadda oo ay tahay inaad raacdo si aadan qof kale u qaadsiin**

- Hubi inaad faashad ku dhejisay boogaha dhammaantood.
- Haddii uu qof kaa caawinayo in meel nabar ah uu faashada kaa beddelayo, waa inuu qofkaasi gacmaha gashadaa bac/caaga gacmaha la gashado.
- Si taxaddar leh u adkee wax kasta oo dhiigaagu uu ku ba'ay inta aanad tuurin ka hor
- Haddii dharkaaga dhiig ku ba'o, waxaad ku dhiqikartaa qasaalada dharka lagu dhaqdo.
- Baraha dhiigga ee wasakhda ah ee tusaale ahaan dhulka (golv) ku dhaca, waxa lagu tirtirayaa qalabka halka mar la isticmaalo kadibna waa la tuurayaa. Markaas kadib ku dhaq meeshii biyo iyo daawooyinka wax lagu nadiifiyo.

**Xeerarka hab dhaqanka, waa khasab inaad raacdo si aanad qof kale u qaadsiin**

- Waa inaad dib u booqataa markuu dhakhtarkaagu ballanta kuu dhigo.
- Waa inaad u sheegtaa in aad qabto "cudur dhiigga lagu kala qaado" marka aad la kulmayso dhakhaatiirta ilkaha ama daryeelka caafimaadka taas oo dhicikarta inay shaqaalahu taabtaan dhiiggaaga sida tusaale marka tijaabo dhiiga ah lagaa qaadayo ama aad qalliin geleyso.
- Haddii aad isku durto mukhaadaraadka, waa inaad haysataa cirbado iyo tuumbooyin adiga kuu gaar ah oo aanad u oggolaan dadka kale inay isticmaalaan. Sidoo kale waa in aadan isticmaalin koobabka wax lagu qaso ee sida wadajirka ah loo isticmaalo iyo weliba agabka kale. Qalabka laysku duro waa in la kaydiyaa si aanay khatar ugu keenin dadka kale.
- Haddii aad u isticmaasho cirbadaha/tuumbooyinka/qalab kale oo laysku duro si aad daawo ahaan ugu isticmaasho, waa in aadan u oggolaan inay dadka kale isticmaalaan.
- Waa inaad u sheegtaa inaad qabto "cudurka dhiigga lagu kala qaado" haddii aad rabto inaad jirka wax iskaga sawirto "tattoo", aad biro jirka iskaga dhejiso "pierca dig", dhegaha iska dalooliso ama si kale laguu daaweynayo oo jirkaaga uu dhiig maqaarka ka imanayo.
- Haddii uu qof dhiiggaaga ka gaaro nabarrada maqaarka, indhaha, sanka ama afka waxaad u baahan tahay inaad u sheegto inuu dhiiggaagu leeyahay cagaarshowga/jooniska C lagaa qaadikaro. Oo aad qofkaa ku guubaabisaa inuu isla markiiba biyo iskaga dhaqo. Waa inuu qofkaasi la xiriiraa xaruntiisa caafimaadka (vårdcentral), rugta caabuqa (infektionsklinik) ee ugu dhow ama 1177 Vårdguiden si uu u helo talooyin dheeraad ah.
- Cid kale ha la wadaagin qalabka lagu xiirto iyo cadayga midkoodna.
- Laguuma ogola inaad bixiso dhiig ama aad ku deeqdo manida/shahwada ama ukunta. Ku deeqidda xubnaha ama unugyada si qof kale loogu geliyo waa wax suurtogal noqon kara xaaladaha qaarkood.
- Haddii ay jirto khatar dhiigbax iyo/ama dhaawac soo gaara xuubka inta lagu jiro galmada/istiinka, waa inaad u sheegtaa lamaanahaaga inaad qabtid cagaarshowga C. Tani sidoo kale way khuseysaa haddii aad qorshaynaysaan inaad isticmaashaan cinjirka galmada (kondom).
- Haddii ay jirto khatar ah dhiigbax iyo/ama dhaawac soo gaaray xuubka inta lagu guda jiro galmada halkaas oo uu gusku ku jiro gudaha siilka, futada ama afka, kondhomka waa in la isticmaalo inta la samaynayo galmada.

Cagaarshowga C waa cudur halis ku ah dadwaynaha sida uu sheegayo sharciga ilaalinta caabuqyadu. Sidaa darteed waxaa waajib kugu ah inaad raacdo xeerarka hab dhaqanka ee uu dhakhtarkaagu ku siiyey. Waxaad ka codsan kartaa in takharka xakameeye cudurada faafa ee degmadaada uu dib u eego sharciyada hab dhaqanka. Inta aanay dacwadaasi dhammaystirmin, waa inaad raacdaa xeerarka laguu dejiyey.

**Ma doonaysaa inaad warbixin dheeraad ah ka ogaato?**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cagaarshowga C waxa laga heleyaa

www.1177.se
www.umo.se
www.folkhalsomyndigheten.se